

**Xuquuqda iyo Waajibaadka
Bukaanka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka UVM**

Xuquuqdaada

- Hel macluumaad caafimaad oo si fudud loo fahmi karo
- In lagula dhaqmo si naxariis leh oo ixtiraam leh
- Ka qaybqaado go'aamada wadajirka ah ee la xiriira daryeelkaaga
- Ogow in macluumaadkaaga gaarka ah la ilaaliyo, iyo sida aan u ilaalinno
- Weydii su'aalo ku saabsan barnaamijka
- Baro dhammaan adeegyada la heli karo iyo xulashooyinka jira
- Ogow cidda ka tirsan kooxda daryeelkaaga
- Hel turjubaan bilaash ah haddii loo baahdo
- Si ammaan ah u gudbi aragti, talo ama cabashooyin*
- Ka bixi barnaamijka wakhti kasta

Waajibaadkaaga

- Sii maamulaha daryeelkaaga macluumaad waxtar leh
- Weydii su'aalo haddii wax aanay kuu caddayn
- U sheeg kooxdaada haddii qorshaha daryeelkaagu kugu adkaado
- Nala socodsii haddii aad rabto inaad joojiso adeegyada

**Ixtiraamka iyo Ka-Qaybgalka Kooxda
Caafimaadka ee Shabakadda UVM**

Fadlan muuji ixtiraam

- U naxariiso shaqaalaha, bukaannada, iyo booqdayaasha
- Isticmaal hadallo iyo falal ka fiirsasho leh
- Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno xilliyada adag

Ma oggolaanayno

- Dhaqan edeb-darro ah ama hanjabaad ah
- Hadal ixtiraam-darro ah oo ku saabsan qof kasta: jinsiyaddiisa, lab/dheddignimadiisa, diintiisa, asalkiisa, naafonimadiisa, da'diisa, dakhliga, xaaladda HIV, adeeggiisa milatari ama xaaladda socdaalka

Dib-u-habayn ama beddelidda shaqaalaha

- Ma beddelno shaqaalaha codsiyo ku saleysan takoorka awgiis
- Xaalado gaar ah (sida dhaawac hore ama baahiyo diimeed), waxaan si taxaddar leh u tixgelin karnaa isbeddel

Haddii aad qabto wax walwal ah, faallooyin ama cabashooyin, fadlan wac lambarka bilaashka ah (Toll-Free) ee (833) 763-0652

- Macaamiishu waajib kuma aha inay la shaqeeyaan xirfadlayaal ay si shakhsi ah u yaqaannaan ama ka baxsan jawi xirfadeed.